

JOYCE
MEYER

NABAD

DARYEELLADAADA OO DHAN ISAGA SAARO

Unless otherwise indicated, all Scripture quotations are taken from
THE AMPLIFIED BIBLE: Old Testament.

Copyright © 1962, 1964 by Zondervan Publishing House
(used by permission); THE KING JAMES VERSION; and from
THE AMPLIFIED NEW TESTAMENT

Copyright © 1958 by the Lockman Foundation
(used by permission).

Copyright © 2014 by Joyce Meyer Ministries – South Africa

All rights reserved. No part of this publication may be
reproduced, distributed, or transmitted in any form or by any means,
or stored in a database or retrieval system, without the prior written
permission of Joyce Meyer Ministries – South Africa.

Joyce Meyer Ministries – South Africa
PO Box 5, Cape Town, 8000

Phone: +27 (0) 21 701 1056
Website: www.joycemeyer.org

Go to tv.joycemeyer.org to watch Joyce's messages in a
variety of languages

Peace – Somali

Not For Resale

TUSMADA

<i>Hordhaca</i>	4
1. Miyaad Nabbad Ku Raaxeysaneysaa?	5
2. Sidee Nabadda Loogu Raaxaysta	7
3. Noqo Mid Nabadi Hoggaamiso	9
4. Kuwee Ayaa Nabadda Kaa Xada?	11
5. Muxuu Sheydaanku Isgu Dayaa Inuu Nabadda Kaa Xaddo?	13
6. Rumaystaha Booskiisa Xilliga Caddibaadda	18
7. Hal Maalin Waqtigii	22
8. Ducadu Nabad Bay Keentaa	26
Baryada Badbaadada	29
Ku Saabsan Qoraayga	30

HORDHACA

“...Raadi nabadda, (Wadda noolaasho; aadan ka cabseyn rabshad, caaddiffo carreysan, iyo isku dhaca anshaxa) iyo doonis xiisaleh. (Si fudud ha u damcin xariir nabadeysan ee ilaahey, assaxaabtaada, iyo naftaadaba, laakiin dabba orod, ha ka harrin ayaga!)” 1 Butros 3:11 AMP

Waan duceynayaa in uu buuggani nabbadda kaa caawin doono oo aad ku raaxeysato “...nabbadda ilaaheey, taasi oo ka sarreeysa fahamka oo dhan...” (Filiboy 4:7).

MIYAAD NABBAD KU RAAXEYSANEYSAA?

Mid kasta oo carruurta Ilaah ka mid ah oo helay dib u dhalashada waa inuu ku noolaadaa nolol ay nabadi ka buuxdo. Ciise wuxuu yiri sida ku qoran Yooxanaa 14:27 (AMP):

“Nabadda aan idiinkaaga tegayo, nabad (dayda) aan haddeer idin siinaayo, iyo dardaarankiina. Sidda adduunku u siiyo idiinma siin. Qalbigiinnu yuusan murugoone, yuusanna biqine. [Joojiya inaad naftiinna ka oggolaataan qas iyo rabasho; oo naftiinna ha u fasixina in la argaggax iyo cabsi geliyo oo si fulaynimo leh xasillooni darro loo geliyo.]”

Runtii qaabkani waa mid aad u xooggan. Fadlan dhowr jeer akhri, dabadeed shan daqiiqo qalbigaaga ku xasili oo ay aad u dhex galaan.

Marka hore, aan ogaano in nabadda Ciise bixinayo ay tahay nabad qaas ah, oo aan la mid ahayn tan adduunka. Nabad caynkee ah ayaa dunida laga helaa? Adduunku wuxuu bixiyaa nabad la dareemi karo. Nabaddani waxay shaqaysaa markii ay naftaadu ay wax walba u hesho sidii aad doonaysay. Hase yeeshee, markii waxyaabahaasi u shaqayn waayaan sidii aad doonaysay, nabaddaasi si dhaqso ah ayey u caraartaa. Ruuxii “carada” ayaa durbadiiba meeshii ka qaata. Nabadda Ciise bixiyo waqtiga fiican iyo waqtiga xun labadaba way shaqaysaa. Xilliga duufaantu socoto ayey nabaddiisu shaqaysaa.

Wax cajiib ah ayey ahaan lahayd, sida maskaxduba u danaynayso, haddii wax walbaaba ay sida aad doonaysid kuugu soconayaan. Waan ognahay waayo-arragnimaddeene taasi sida baddan kama dhacdo nolosha runta ah. Rumayste ahaan, waxaan isku dayey sannado badan

inaan isticmaalo iimaankeyga oon iska saaro wax walba oo aanan jeclayn ama aan fiicnaan i dareen siinayn. Tani jahwareer xad dhaaf ah ayey i gelisay. Isku dayga inaad sameyso ineeey wax dhacaan aan dhaceyn ama aan dhici doonin waa niyad jab aad u weyn. Markii aan xagga Ilaah ka helay waayo aragnimo, ayaan waxaan ugu dambayntii bilaabay inaan xaqiiqsado in aan u baahnahay in aan imaankayga isku dajjiyo oo aan si nabad ah u dhex qaado duufaanta tijaabada nolosha. Waxaan u baahnaa joojinta in aanan shayddaanka u oggolaanin inuu nabaddayda xado markasta oon dhan isu rog.

Ciise wuxuu yiri sida ku jirta Yooxanaa 14:27, “Joojiya inaad naftiinna ka oggolaataan kacdoon iyo jahawareer.” Wax baddan oon aqriyo qorraalaka oon u dhawaado, wax baddan aan ogaado inuu kitaabka Qudduuska ahu ii sheegayo in aan waxan shaqsi ahaantayda u samaynayey. Waxaanna u baahnaa in aan joojiyo. Isagu wuxuu aayadda dhexdooda ku sheegay “Qalbigiinnu yuusan murugoon, yuusanna biqin.”

Ciise wuxuu xertiisii ku canaantay rumaysad la’aantooda sida ku jirta Markos 4:40 waayo duufaantii kacday dhexdeeda ayey nabaddoodii ku waayeen. Marna nabaddu kama tegin Ciise. Meesha dambe ee doonnida ayuu hurday. Xertu waxay gashay xaalad argaggax iyo calool xumo ah.

Bal adna iska warran? Ma nabad ayaad Ciise ku haysataa meeshaas dambe ee doonnida? Haddii aadan nabad haysan, nolosha kuma raaxaysan doontid.

SIDEE NABADDA LOOGU RAAXAYSTA

Ma jirto farriin caawimaad yeelata illaa tilmaan aad ka heshid sidii aad u hanan lahayd waxa aad u baahan tahay. Sheegidda inaad nabad u baahan tahay waa tallaabada koowaad. Ha yeesh ee addigoon fical ahaan u wadaagin sidaad nabad ku heli karto, wax mirraa oo run ah dhalan maayaan.

Hal shay ayaa si xoog leh iiga caawiyey inaan bilaabo inaan nolol nabad qabta ku raaxaysto. Waxaan xaqiiqsaday in faa'iido darro iyo jah wareer ay tahay “in aan wax aan awood u lahayn wax ka sameeyo.” Adigu taas ma samaysaa? Ma waxaad doonaysaa inaad naftaada ku jaha wareerisid si wax uun u dhacaan? Ilaah ayaa wax walba waqtigooda kaamilan u haya. Waa inaad sugtaa waqtigiisa.

Sida ay u badan tahay marna adigu shay xilligiisa ka hor ma samayn kartid. Marna kuma faraxsanaan doontid haddaad shay xilliga ka hor samaysid. Baro inaad Ilaah sugtid. Tani xushmo ayey Isaga u tahay, adna nabad ayey ku siinaysaa.

Ma waxaad isku dayeysaa inaad samayso wax aan macquul ahayn? Ma waxaad doonaysaa inaad beddesho dadka kugu hareereysan—laga yaabee kaad is qabtaan, mid ka mid ah carruurtaada, saaxiibkaa, ama qaraabada? Dadku dad ma beddeli karaan. Ilaah uun baa qofka qalbigiisa gelin kara oo isaga ama iyada ka dhigi kara inuu doono inuu is beddelo. Haddaan dadka dusha sare ka qassabno innagoo ka dalbaneyna iyaga, waxeey ku dhammaaneysaa xatooyada qof kasta nabaddiisa. Nalooma abuurin inaan sharciga ku hoos jirno. Dadku xorriyad ayey u baahanyihiin. Waxay u baahan yihiin meel ay ku dhaqdhaqaaqaan.

Waxaan isku deyay inaan Daa,uud ka joojiyo cayaarta goolafka dhawrkii sanno ee guurkeenna ugu horraysay. Waxaan dareemay inuu aad u cayaaray, waxaana doonayey inuu aniga in badan ila joogo. Wax walboo karaankayga ah waan isku dayey. Qidad kasta ayaan isticmaalay. Farxaddarro ayaan dareemay. Waan isla waashay. Waxaan isku dayey inaan qanciyo. Dawo aammusnaan ah ayaan siiyey. Waxba way shaqayn waayeen. Mar kasta waan caraysnaan jiray. Mar ayuu iska joojiyey oo illaa muddo muusan cayaarin. Arrinta xiisaha lihi waxay ahayd inkastoo aan helay wixii aan u baahnaa, weli wax nabad ah maanan helin. Nabad maanan haysan waayo wixii aan rabay ayaan waddo qalad ku doonay. Haddaad isku dayeyso inaad qof ku beddeshid xoog, nabaddaada ayaad iska qaadaysaa.

Miyaad in badan naftaada u carootay marka aadan joogin booskii aad xagga ruuxa ka doonaysay inaad ka taagnaato? Ma doonaysaa inaad naftaada beddeshid? Hubaashii waxaad u baahan tahay inaad Ruuxa Qudduuska ah u daysid shaqada uu noloshaada ka dhex qabanayo. Waxa uu kuu keenayaa kaamilnaan iyo qaangaarnimo. Adigu shaqsi ahaan uma samayn kartid. Tani waa meel kale ood isku dayeyso inaad sammeyso wax aaddan sameyn karrin.

Waxaan hubaa inaad arki karto waa dabiici inaad isku daydo inaad isbedel ku sameyso waxii aadan ka hellin. wax yar noqo waaqici. Sideed ugu guulaysan kartaa inaad waxyaabahan beddesho? Miyaad naftaada jaha wareerinaysaa oo nabaddaada iska luminaysaa halkii aad Ilaah ka sugi lahayd iyo waqtigiisa, oo aad ku aamini lahayd dadka kale ee noloshaada ka midka ah iyo xitaa nafsaddaada?

Aan soo kobo anigoo dhahaaya sidan: Haddii aad “isku dayeysid inaad wax ka qabatid wax aadan waxba ka qaban karin,” waad jah wareeri doontaa nabadna kuma raaxaysan doontid.

NOQO MID NABADI HOGGAAMISO

Kolosay 3:15 waxuu leeyahay:

“Oo ogolaaw nabadda (nafta isla noolaashada taas oo ka timmaadda) ganuunka Karastos (ee u fal-gala sida xukun joogto ah) gudaha wadnyaashiina (go,aansanaaya, fadhiisinayana ugu dabeyns dhammaan su,aalaha maddaxaaga ka guuxaaya...)”

Garsoorida ciyaarta banoonigu wey go,aansaneysaa haddii aad ku jirto ama aad banaanka ka tahay. Nabadu waa tan leh go'aanka in noloshaada waxaas ku jirayan amey ka baxsanyihiin.

Dad badani kuma raaxaytaan nabadda maxaa yeelay doonistii Ilaah ayey ka tageen. Doonistooda ayey raaceen halkii ay doonista Ilaah ka raaci lahaayeen. Waxa ay sameeyaan waxa ay dareemayaan iyo waxa ay iyaga saxa u arkaan halkii ay ka raaci lahaayeen Ereyga Ilaah oo ay nabaddu ku hoggaamin lahaynd. Mararka qaar waxaa soo baxa wax ay tahay inaan qabto. Si fiican bay u muuqdaan, fiicnaan baa laga dareemayaa, oo wax wanaagsan ayey noqon karaan. Ha yeeshee, haddii aanan nabad haysan, waxan bartay inaan iska dhaafto. Noqo miday nabaddu hoggaamiso. Wax ha iska iibsano, gaar ahaan ganacsiga ballaaran haddaadan nabad ku qabayn. Muhiim ma aha inta aad rabbid u qabto, waad ka xumaan doontaa haddii aad ka hor timaado hoggaaminta Ruuxa Qudduuska ah.

Mararka qaar waxaa la ii siiyaa fursad aan uga hadlo wax ku saabsan is doonashada taas oon ka hello inaan qaato, laakiin nabad kuma qabo waxaas. Ma garanayo sababta, laakiin mar-mar nabad kama jirto halkaas. Waxaan bartay in haddii aan iska qaato si-kastaba ha ahaatee,

ay ii iman doonto sababtu mar kasta waxeey noqotaa wax ku saabsan maxaa igu qasbay inaan raaco nabadda.

Hal howlgal ayaan xusuustaa waa markii ugu horeysay oon bilaabay safar. In laga Hadlo kulamadu aad ayeey u yaraayeen weeyna kala fogaayeen. Dabiici ahaan, waxaan doonayey inaan dhammaantood ka wada hadlo. Waxaan kaniisad Texas ku taalla ka helay casumaad. Taasi aad ayey ii qiiro gelinaysay markaas. Waxaan irri “haa” isla markaaba. Labo toddobaad kaddib, waxaan is arkay aniga oo gudaha ka shidan oo had iyo goor middaas ka fakaraya. Waan is adkeeyay oon is adkeeyay. Waxaan si muuqata u arkay inaan wax nabad ah ku qabin aadista meeshaas, welli Ilaah iima sheegin wax sabab ah.

Waan sugay oon sugay. Ugu dambayntii, waxaan gartay inaan iyaga waco oo aan fasax ka weyddiisto ballanqaadkaas. Waxaan u sheegay inaan u iman doono haddii aanay qof ku habboon oo I beddela helin, haddana waxaa jirtay sabab nabad la’aan ah oo ii diidaysay inaan baxo. Weey iga fasaxeen ballanqaadkeygii.

Dhowr toddobaad kaddib waxaan ogaaday in kaniisaddaydu ay iskugu teggeyso dhismaheeda cusub dhammaadka toddobaadkii ay ahayd inaan meeshaas aado. Waxaan ahaay ku xigeenka wadaadka kaniisada waqti xoogaa ah inta aanan bilaabin maamulkeyga, aad ayeey muhiim iigu ahayd inaan munaasibaddaas la joogo.

Maxay ahayd sababtii Rabbigu iigu sheegi waayey waxa socday? Sabab uun buu u doortay inuusan samayn. Ereygiisu wuxuu sheegayaa inay nabadu ku hoggaamiso. Marar baddan waa intaas kaliya Wuxuu ku siindoonaa ogolaasho ogaal ah haddii aad ku “jirto” ama “aka baxsantahay”.

Kuma raaxeysan doontid nolol nabadda haddii aad adeeci weydo hogaamintiisa ood raacdo rabbiddaada.

KUWEE AYAA NABADDA KAA XADA?

Hubaal waxyaabo ayaa dhibaaya qof walba. Shayddaanku waxa uu noloshaada oo dhan ku qasirayaa sidii uu adiga kuu daraasayn lahaa. Ugu dhawaan sidaad addigu isu taqaanid si ka fiican ayuu naftaada u yaqaan. Wuu yaqaanaa waxaad dhibsaneysid. *Waxad u baahan tahay inaad ogtaatid waxa ku dhibaya*, ood ka taxadirta waqtiydaas ineeyan kaa lummin nabaddaadu.

Qofkasta “nabaddiisa xadayaal” isku wada mid ma ahan. Waxaa jira waxyaabo aniga i dhibaya oo aan gebi ahaanba Daa,uud dhibaynin. Tusaale ahaan, shanqar la,aanta ayaan jeclahay, buuqose ma dhibaayo isaga. Buug ayuu akhrisan karaa intee y mid ka mid ah inamadeena rikoorkeedu ku shidanyahay cod dheer oow wiilkeena sagaal jirka ah la legdamaayo gurriga dhexdiisa eey.

Uma dulqaadan karro degdegga, daahidana waa necebahay. Mararka qaar daa,uud wuxuu isku dayaa inuu wax baddan sammeeyo waqtiyo baddan. Waxaan ku dhammaanaa daqiidaha ugu dambeeya dedeg aad u baddan. Tan ayaa ah waxa uu shayddaanku igu yaqaan, wuxuuna isku dayaa inuu middan nabaddayda iiga xado. Daa,uud dhanka kale, mar kasta waxuu rabaa inuu gaaro ayraboorka ugu yaraan saacad ka hor markaan meel uun u duuleyno. Waxuu rabaa inuu gaaro ciyaarta golf ka mar horre markuu golf ciyaaraayo. Hadduu sheydaanku u diyaariyo asaga inuu ka daaho dhacdadaas, Daa,uud wuxuu billaabaya inuu dhummiyo nabaddiisi.

Waan kala duwan nahay. Taas awgeed, Shayddaanku wuxuu medkeen kasta u adeegsadaa tab gooni ah. Iska dhig inaad ka xarriifsantahay. Sidii uu kaaga caraysiin lahaa ayuu kuu diyaarsanayaaa. Kuwee ayaa

nabadda kaa xada? Tixane u samayso oo qoyskaaga la wadaag. Soo ogoow waxa iyaga ka caraysiisa, dabadeed isku daya inuu midkiinba mid-kale ka caawiyo inaad ka leexataan meelahaas.

Daa,uud waa golf ciyaare daacad ah. anigu wan cayaaraa, balse waxa aadka iigu fiican waxaa weeye qosolka iyo farxaddeeda inta aan ku dhex jiro cayaaranteed. Anigu waan bartay, ha yeeshee caqli iima aha inaan Daa,uud aad uga ag dabbaleeyo marka aan la cayaarayo oon la kaftamo markuu qalad u gemmo. Tani maaweelo ayey inoo tahay laakiin waxaan doonayaa inaan sameeyo wax isaga raaxo geliya. Ma jiro dareeme qasaare ka weyn in uu qof nabaddiisii ama nabaddeeda waayo. Markaad aad qof wada noolaataan muddo aad u dheer, waxaad bilaabaysaa inaad ogaato meeshuu ku liito ama meeshey ku liidato sidoo kale taada. Waxaan ku soo celinayaa mar kale, “Isku daya inuu midkiinba kan kale caawiyo meelahaasna iska jirra.”

Daa,uud wuxuu iga caawiyaa meesha aan ku liito. Waxuu isku dayaa inuu iga caawiyo shanqar la,aanta waxyaabaha. marka aan isku deyaayo daraasadda ama aan nasanayo. Wuxuu igu dhiirri geliyaa in aan nasto oon madadaasho maxaa yeelay wuu yaqaan marka aan aad u daallannahay, in shaydaanku uu nabaddayda iga xadayo. Galatiya 6:2 wuxuu oranayaa “Midba midka kale culaabta ha u qaado...” Waxaan u baahan nahay in midkeenba kan kale daciifnimadiisa u dul qaato, oo aan xaqiiqsano in dhammaateen aan wada leenahay oo uu midba midka kale u duceeyo.

MUXUU SHEYDAANKU ISGU DAYAA INUU NABADDA KAA XADDO?

Waan ognahay in nabaddu ay nagu xirto Ruuxa Qudduuska ah. Haddii aan si kale u dhaahno waa sidaas Ruuxa Qudduuska ah wuxuu ka dhex shaqeeyaa oo kaliya jawi nabadda. *Xoog ayaa ku jira nabadda.* Waxaan aaminsanahay taas weeye sababta Yooxahaa 14:27 (AMP) uu noogu sheegay sidaas dhaxalkeena Ciise waa nabad. Ciise ayaa yirri, “.....nabaddayda ayaan haddeer idin siiyay oon idin kala dardaarmay....” Haddii aan si kale u dhahno, nabaddiisa ayuu inoo hibaynayaa.

Haddii aad dhibaato qabtid oo aanu shayddaanku kuu kaxayn inuu kaaga carreysiyo, xooggiisu kuma uu qaban karo. Xooggaagu waa xaffidanahay degganaasho, nabad, iyo dabeecad aammiinaad leh. Awoodda shayddaanka ayaa kuu sababaysa inaad carootid oo aad cabsatid.

Markaad is aragtid naftaada adigoo xaalad mushaakil ku dhex jira, ujeedkaaga fudud ha noqdo inaad degganaan ku joogtid. Ha ku dhex ciyaarin gacmaha shayddaanka adigoo carroonaaya. Aad ayuu ugu diirsadaa marka caadifadaada uu kaa caraysiiyo. Caadatan, waxa ugu horeeya ee qof sameeyo markuu xaalad caadifto ku jirro waxyaabo ayuu afkiisa ka dhahayaa kuwaas oo siinaaya sheydaanka shiidaal oow dabka ku sii shiddo haddeer oow bilaabay. Yacquub 3:5,6 (lagu sharaxay) waxow leeyahay: carrabku waa xubin yar, laakiin dab weyn bilaabi kara. Isagu waa dunida sharka ee laga dhigay qeyb naga mid-ah ee wasakheysan fasaadisana jirka oo dhan, waa dab shidde naareed. Waad ka arki kartaa qoraalkan sida ow Sheydaanku u rabo

inuu kontrolkiisu kaa dhummo asaguna kontrolkiisa ula wereego. Xasuuso, *sheydaanku waa ku sirraa si oow kaaga careysiyo.*

Waad ka warqabtaa in shayddaanku uu shaqadiisa laba jibbaaro marka aad isu diyaarisid aaddista kaniisadda ama aad Kitaabka Qudduuska ah baraneysid. Sannado badan, gurigeenna agtiisa subaxda Axadda waxeey u ekaataa sidii feesto weyn oo kale. Marmar dhif ah ayey noo suurtoobi jirtay in aan kaniisadda tagno iyada oo aanan mid careysnayn, aalaana mid walba ayey saamayn jirtay.

Subaxda Axadda waxyaabuhu waa dhummaan, daataan ama jabbaan si ka duwan maalmaha kale ee usbuuca. Carruurteenu caadi ayey ahaadaan maalmaha kale ee toddobaadka, balse aroorta Axadda, weey dagaallamaan. Mar kasta oo buuq iyo sawaxanku sii bato carada ayaa igu sii badan jirtay. (Xusuusnoow, anigu qeylada baddan ma jecli).

Ugu dambaynta, waxaan bilaabaa cabasho. Daa,uud waa necebyahay cabashada, taas awgeed wax yar dabadeed wuxuu ii sheegaa inaan cabashada joojiyo, kaddibna isaga ayaan waalli kula dhacaa. Dabadeed carruurta ayaa ooyi jirtay marka aan aniga iyo Daa,uud muranno.

Inta u dhexeysa waxaan oo dhan, eeygu wuxuu bilaabaa inuu gurriga orod kula wareego kob qof u baahanyahay inuu gashado, kaddibna waxaan bilaabaa inaan ku qayliyo “Dhaqsada! Intan ka badan waannu daahaynaa!” Waan hubaa inaad fahantay dhacdadaan.

Markii aan arkay Yacquub 3:18, waxaan fahmay sababta ay middani u dhici jirtay marka aan u baxeyno inaan Ereyga maqalno. Qoraalku wuxuu leeyahay (AMP), “Beer goosashada kuwa xaqa ah “...waa [iniinta mirraha] oow abuuray” (erayga) “nabaddu kuwii u shaqeyay iyo nabaddoonada”

Si kale haddaan u dhaho, si Ereyga Ilaah uu xididdo u yeesho oo uu nolosheenna dhexdeeda mirro wanaagsan uga soo saaro, waa in lagu wacdiyaa oo la baraa qof nabadda ka shaqeyaa naftiisa. Sidoo

kale, waxaan u baahannahay dabeecad nabad ah marka aan maqalno Ereyga.

Kaliya ka fikir naftaada. Immisa jeer ayaa cadawgu kaa guulaystaa isku daygiisa uu kaaga caraysiinayo inta aadan aadin inaad maqasho Ereyga? Xusuusnow inaad u fiirsato qorshahiisa. dabadeed si cayaar ah gacmihiisa ha u saarin. Kitaabka 2 Korintos 2:11 (AMP) wuxuu leeyahay saas “jaahil kama nihin” Shayddaanka “xeeladdahiisa iyo fiiradiisa gaarka ah” The King James Version wuxuu ugu yeeraa “aaladaha” Sheydaanku isticmaalo xeeladdihiisa uu ku khiyaano oow kugu hugaamiyo dhummis. Aynnu ka xariifsanaanno shayddaanka.

Kowaadka Butros 5:8 (AMP) wuxuu leeyahay: “si wanaagsan isu dheeli tira (dhexdhexaad ah maskax miyir qabta) Foojignaada oo soo jeeda waqti kasta; waayo, cadowgiinna, Ibliiska ahu agagaarkiina ayuu meereysanayaa sida libaaxi u ciyaya [gaajo kulul awgeed] raadinaaya qof uu qabsado oow liqliqo.”

Ha u oggolaannin in qofkaasi adiga noqdo! Waxaan kugu waaninayaa in aad feejignaatiid. Mar kasta oo aad caro ama booqsanaan dareentid, joogso oo weyddii su,aalahan naftaada: “Muxuu shayddaanku isku deyayaa inuu sameeyo? Haddii aan dareennadan diidmada ah boos siiyo, maxay natiijadu noqon doontaa?”

Efesos 4:36, 27 (AMP) sidoo kale waa Qoraal muhiim ah oo ina baraysa in aan ka ilaalino shayddaanka inuu ka hello cagga dhigasho nolosheena si uu nooga caraysiiyo. Aayadda 26 waxeey leedahay, “... (daalka, carradaada kulul ama xanaaqu) yuu gaarin inta qorraxdu ka dheceyso.” Haddii aan si kale u dhahno, “Carro ha ku joogina.”

Aayadda 27 (AMP) waxeey leedahay, “ha uga teggin [sida] qol ama cagga dhigasho Sheydaanka [fursad ha siinin isaga].” Marka aad carrootid, farxaddaada ayaad luminaysaa. Marka aad farxaddaada lumisana, xooggiinna ayaad luminaysaan. Nexemyaah 8:10 wuxuu yirri, “farxadda Rabbiga ayaa xoog idiin ah.” Boqor Daa’uud oo ah qoraaga Sabuurraa 42:5 (NKJV) isaga oo ruuxiisa la hadlaya wuxuu

yirri, “...bal maxaad la murugaysan tahay?....” Ishacyaah 30:15 wuxuu yirri “...xasilloonaan iyo kalsooni ayaad xoog ku yeelan doontaa....” Waxaan haddana aragnaa sida uu shayddaanku xasarad noogu abuuro si uu xooggeenna nooga wiiqo.

Waxaan ka bartay Ruuxa Qudduuska inuu ku shaqeeyo jawi nabadda. Ruuxa Qudduuska ahu kuma dhex shaqeeyo jahawareer. Shayddaanka ayaa jahawareerka ka dhex shaqeeya, laakiin Ruuxa Qudduuska ahu nabadda ayaa ka dhex shaqeeyaa. Ka dhig nabad Gurigaaga, ganacsigaaga, kaniisaddaada ama maamulkaaga.. haddii aad sidaas yeeshid, waxaad xushmeyneysaa Ereyga Ilaahy iyo Ruuxa Rabiga. Waxaad gurandoontaa Mirraha addeecistaada.

Xusuusnow, Ciise wuxuu toddobaatankii u diray labo labo si ay shaqooyin badan oo waaweyn u sameeyaan: ineey shayddaanka saaraan, kuwa buka bigsiyaan oo Injiilka ku wacdiyaan. Wuxuu u sheegay inay tagaan magaalo, guri ka raadsadaan, si nabad ah ula hadlaan oo ay halkaas ku negaadaan. Haddii aan loo soo dhaweyn (si nabad ah), waxay ahayd in ay cagahooda boorka ka jaftaan oo ay ka tagaan. (Luukos 10:1-11,17). Sababta? Shaqadoodu, awood la’aan ayey noqon lahayd haddii aanay ku jirrin nabad.

Waan hubaa inaad bilaabeysid isbedel inaad hesho farriinta buuggan uu kugu talagalay inuu horey kuu soo dhiggo. *Ma ku taba barraneysaa sida ugu fiican inaad naftaada kontaroosho ood markasta nabad ku degto.*

Luukos 22:46, Ciise wuxuu inna baraayaa in aynaan jerribaadda ku dhicin, wuxuu xerta ku yiri, “Kaca oo tukada inaydnaan (sida ay u dhan tahayba) jirraabaadda gelin.” Marna ha isku deyin inaad naftaada ama xooggaaga iskaaga caabiso Sheydaanka dhankan. Ducayso maalin kasta in Ilaah ku siiyo nimco aad shayddaanka iskaga caabbisid marka uu isku dayo inuu nabaddaada kaa xado. Rabbiga weyddiiso inuu ku xoogeeyo oo ku caawiyo.

Xusuusnow, Yooxanaa 15:5 (AMP) wuxuu yirri, “aniga la’aantey...

waxba ma samayn kartaan.” Ha isku dayin in aad addiga naftaadu samaysid! Caawimaad dalbo. Waxaad wax walba ku samayn kartaa caawimaadda Ciise (Filiboy 4:13) laakiin adigu waxba isuma samayn kartid. Yooxanaa 5:30 (AMP) xitaa Ciise wuxuu sheegay inuusan nafsad ahaantiisa waxba u samayn karin. Waa in aad lahaataa garasho is hoosaysiin leh haddii aad rabtid in Ilaah ku caawiyo. koowaadka Butros 5:5 (NKJV) wuxuu yirri, “Ilaah waa hor joogsadaa kuwa kibra, laakiinse kuwa is-hoosaysiia ayuu nimco siiyaa.”

Aan soo koobo inaan sheego in shayddaanku doonayo inuu nabadaada kaa xado si uu kaaga xado xooggaaga. Wuxuu rabaa in aad noqotid mid daciif ah oo aan tabar lahayn. Balse waxaan kugu dhiirigelinayaa “...Ku xoogaysta Rabbiga iyo xoogga itaalkiisa.” (Efesos 6:10). *Nabad ku jooga!*

RUMAYSTAHA BOOSKIISA XILLIGA CADDIBAADDA

Efesos 6:13 (AMP) wuxuu yirri “...sameynta waxaan oo dhan [dhibtu waxeey dooneysaa], in loo staago (si adag goobtiina).” Waa maxay “goobtiinu”? Efesos 2:6 waxay ina baraysaa in booskeena aan ku leenahay Masiixi. Ereyga u *taagan* waa tarjumaadda ereyga Greek ga *histemi*. Mid ka mid ah macnaheedu waa “ku jirid.” Ereyga Giriigga ah ee *kujirid* u taagan ee Yooxanaa 15:7 waa *meno*. Mid ka mid ah macnayaasha ayaa ah “taagnaan.” *Meno* waxaa mararka qaar loo tarjumaa *taagnaan*. Ciise wuxuu yirri, “Haddaad igu jirtaan, oo ay erayadayduna idinku jiraan, weyddiista waxaad doonaysaanba, waana laydiin yeeli doonaa.” (Yooxanaa 15:7 NKJV). Booska kujiristu waa meesha xoogga.

Cibraaniyada 4 waxey leedahay sidaas markaan joojino halgamadeena, oon shaqeyno bedelkeedi (annagoo u maraayna iimaan iyo addeecis) si aan u galno nasiinada Ilaahey, waxaad gellidoontaan nasiinadiisa. xilliga jarribaadda lagu jiro, sameey waxa Ilaah kugu hoggaaminayo inaad samayso, dabadeed sug ama qaado booskaaga Masiixi ee daawo shaqada oow ka qabanaayo wakiilnimadaada. Kitaabka Qudduuska ahu wuxuu leeyahay “...iska taagnaada, oo bal arka badbaadada uu Rabbigu maanta idiin samayndoono.” (Baxniintii 14:13). Ereyadan oo dhan—kujiris, joogis, nasiino, taagnaan, iyo Masiixa dhexdiisa waxeey dhahayaan wax yaabo aasaas isku mid ah: *Nabaddiinna ha iska luminina!*

Kitaabka Filiboy 1:28 (AMP) waa midka ugu xoogga badan Qorraalka Kitaabka Quduuska kaas oo ku soo hor dhiga qodobkan cod dheer oo muuqda. Wuxuu leeyahay: “Haba sameynin [xattaa in yar] inaad ka cabsato ama uu ku haddado mucaaradkaaga iyo

cadowgaagu, tusaalahan [joogtada iyo cabsila,aanta] waxeey u noqoneysaa callaammad muuqata (oo caddaan ah iyo gool) ayaga [xannibaaddooda] halaagga, laakin [calaamad hubaal ah iyo marqaati] samata bixintaada iyo badbaadadaada, taasi ineey ilaahey ka timmid.”

Si cad ayuu Qoralkanu inoogu sheegayaa. *Marka lagu soo weeraro, ku joog nabaddaada.* Taas ayaa sheegaysa in shayddaankii laga adkaaday. Waxuu kugu sameeyo ma garanayo mar haddii uu kaa caraysiin waayey. sidoo kale waxay kuu xaqiijinaysaa in waxani ay xagga Ilaah kaaga yimaadeen maxaa yeelay dabeecadda nabadda iyo nasiinadu waxeey muujinayaan inaad ku shaqeyneyso aaminaad run ah. Cibraaniyadda 4 waxeey leedahay: kuwa galay nasiinada Illaaheey weey aaminsanyihiin.

Iska soco oo sii raaxeyso noloshaada inta Ilaah dhibaatooyinkaaga ka shaqaynayo. Waxaan rumaysanahay dadka sida baddan waxeey qabaan nuucyo fikir faaruqa oo dhahaaya waa qalad inaad raaxeysato naftaada markeey dhibaatooyin ku heystan. ka dib waxaas dhan, haddii aadan wax kale ka qaban karrin, ugu yarraan waad murrugoon kartaa.

Waan garanayaa qibrad ayaan u leeyahay wax baddan oo fikirka nuucaan ah sannaddihii la soo dhaafay. Markii aniga iyo Daa,uud ay wax jarribaad ah ama dhibaato ah na soo food saarto, asagu wuu iska faraxsanyahay wuuna iska raaxeysanayaa. Anigu aad ayaan u murugoon jiray oo asaga ayaan ku kici jiray maaddaama uusan iila murugoonayn.

Sida baddan hardankeenu wuxuu ahaay xagga dhaqaalaha. Daa,uud rumaysadkiisu aad ayuu xagga lacagta uga xoogganaa. Wuxuu orran jiray, “Waan bixinay meel tobnaadkii deeqna waan ka dhiibnay baahiyadii aan aragnay. Kitaabka Qudduuska ahu wuxuu inoo sheegayaa, ‘Welwelkiinna oo dhan isaga saara, maxaa yeelay, isagu dan buu idinka leeyahay.’ (1 Butros 5:7). Kitaabka Qudduuska ahu wuxuu leeyahay, Ilaahey wuu daboolidoonaa baahiyadeenna oo dhan (Filiboy 4:19), haddaba maxay tahay sababta aan uga welwelayaa?

Welwelku lacag inoo keeni mayo. Weligeed dhici mayso.”

Tani waxeey aheyd “taagnaanta” Daa,uud qaatay. inta Ilaahey dhibaataadeenna xallinayay Daa,uud horay ayuu u socday noloshiisana wuu ku raaxaysanaayay. Waxaan ku dhahay, “Waxaas oo dhan waan garanayaa, Daa,uud, balse waxba kama qaban kartid.” Waxaan ka rabaa inuu wax uun sameeyo. Markaas wuxuu dhahayaa, “Waa yahay, Joyce, maxaad iga doonaysaa in aan sameeyo?” Waxaan ku dhahayaa, “Duceey! Waa inaad ducaysaa.” Wuxuu dhihi jiray, “Waan sameeyay. Waan duceeyay waxaana Ilaah ka dalbaday in uu dhibaataadaas Isagu xalliyo. Waxaan weyddistay inuu I tusso haddii ay jiraan wax kale oo uu Isagu iga doonayo in aan sameeyo. Waxba imma uusan i tusin, sidaas darteed umma jeedo sabab aan u murugoodo.”

Aad ayaan gudahayga uga garanayey in Daa,uud saxan yahay. Weli, waxaa jiray wax igu adkaynayey in aysan jirin ku adkaysasho inaan iska raaxaysto aniga oo dhibaato I haysato. Sannado badan ayey mar walba natiijadu sidaas ahayd: mar kastoo ay dhibaato na soo food saarto Daa,uud wuu ducayn jiray oo nabad ayuu ku joogi jiray, aniguna waan ducayn jiray haddana walaaci jiray. Nafteyda ayaan murugo geliyey. Daa,uud noloshiisa wuu ku raaxeystay, sidaas ayaa Ilaah ugu dambaysta noogu iman jiray. Had iyo goorna waa ay noo wanaagsanaan jirtay.

Ilaah ayaa mahad leh, ugu dambayntii waxaan rumaystay in aysan jirin wax aan sameeyay oo guul ku dhammaaday. Waxaan sameeyo oo dhan nafteyda weey murrugeynayeen, oo malaha sii dheeraato jawaabtii Ilaah isiin lahaa. Imminka *nabad ayaan ku raaxaystaa duufaanta dhexdeeda*. (Markos 4:37-40.)

Ciise wuxuu yirri, “Dunida waxaad ka helee fitno, laakiinse wanaag faraxsanaaw, anaa ka adkaaday dunida” (Yooxanaa 16:33). Sidoo kale Kitaabka Qudduuska ahu wuxuu inoo sheegayaa in jerribaaddu ay imanayso, waxaase la inaku dhiirigelinaya in aynaan ku dhicin jerribaadda. (Luukos 8:13; 1 Korintos 10:13; Yacquub1:12). Odobkeyku waa midkaas adag, waxyaabaha looga gudbo, ay had iyo

goor noloshan dhexdeeda ka jirayaan, balse waxaan uga guuleysanaa jidka Ciise Masiix. (Rooma 8:37.)

Ma nihin ka guulaystayaal, laakiin waxaan nahay had iyo jeer ka guulaystayaal. Marnaba ma gaaraysid booska aad caqabad oo dhan mar hore ka guulaysatay, balse waxaad haysataa hubantida aad magaca Masiixa wax walba kaga guulaysan doontid. Weligaaba waad guulaysanaysaa!

Waa inaad timaaddid booskuu uu rasuul Bawlos kaga dhex hadlay Kitaabka Filiboy 4:11, 12—wuxuu sheegay inuu bartay sida farxad loogu (nabdoonaado) haddii isaga la hoosaysiiyo iyo haddii sare loo qaado intaba. Haddii aanad middaa yeelin, noloshaadu waxa ay ka koobnaan doontaa hal taxane oo ah murugo ay murugo kale xigto. Xusuusnow middan: Haddii shayddaanku uu duruufaha dhexdooda kugu xukumo ama kugu maammulo, mar kasta suulashiisa ayaad ku hoos jiri doontaa. Waxaad amarkaaga ku socon karaysaa markii aad had iyo goor nabad haysatid.

HAL MAALIN WAQTIGII

Jidka la hubo oo aad nabaddaada ku waayneysid waa welwelka berrito. Matayos 6:34 (AMP) wuxuu leeyahay: “Haddaba ha ka welwelina, hana ka walaacina berrito, berrito iyadaa isu welweleysa oo isu walaaceysa nafteeda. Maalinta sharkeedu waa ku filanyahay.”

Sideena badan waan haysannaa in nagu filan oo aan qabano maantay annagoon ka welwelin burrito. Ilaaheey wuu ku siinnayaa nimcada maantay, laakiin kuma siindoono nimcadii berrito illaa burrito ay timaaddo.

Hadaba sida baddan dadku waxeey ka welwelaan ooy ka welwelaan wax aan inaba dheceyn. “Maxaa haddey” waa dhibbaato. Marka aad maqashid “maxaa haddii” middan ama middaas ay qalbigaaga ku soo dhacdo, iska jir. Waxaad qarka u saran tahay inuu ku jiiito walaacu. Dadka qaar in badan ayey welwelaan illaa welwelkoodu ku noqdo cabsi, oo sida baddan waxa dadku ka cabsadaan ayaa ku yimmaada ayaga. Ilaaheey waxaan wax uga helli karnaa aamminaadda. Sheydaankan waxaan wax uga helli karnaa cabsida.

Ha isu ogolaanin inaad berri ka naxsanaato. Kaliya ogoow Ilaaheey inuu aamminyahay. *Wax kasta oo berri heyso, berridaba Isaga haya.* Nimcadiisa ayaa ku filan inay kaafiso baahida. Ha ku dhumminin nimcadda maantay aad ku raaxeysaneysid maantay inaad ka welwelsho berry. Xaqiiqdii yaab ayeey leedahay waxaan ku guuleysan karno ee Ciise hadii aan noolaano hal maalin waqtigii.

Casharkan waxaan bartay markii aan bilaabay inaan kuliyaadda Baybalka wax ka baro. Toddobaadkii hal mar ayaan kaniisadda xaaffaddeyda wax ka barayey taasoo aan wadaad ku xigeen ka ahaay. Afar carruur ah ayaan lahaa iyo shaqa waqti buuxada oo

dhammeystiran markii ay timid fursadda aan kuliyadda Baybalka wax ka barayo kaniisadda toddobaadkii saddex jeer. Runtii aad ayaan u daneynaayay inaan barro Erayga wax baddan, waana tan fursaddii barrista seddex jeer todobaadkii.

Si kastaba ha ahaatee, markaan barayyo, sidoo kale waa inaan darraaseeyaa oon diyaariyaa. Fasallo baddan wey ku qotto-dheeraadeen barashada Kitaabka Quduuska, taas oo macnaheedu yahay inaan wax baddan qoddo errayga si aan ugu diyaar garoobo, gaar ahaan sannadka ugu horreeya. Wax barashada oo dhan waxay dhacaysay fiidkii, maxaa yeelay shaqadaydu waxa ay ahayd waqtiga maalintii. Maana aanan u jeedin sida ay ku suurageleyso inaan sammeeyo, laakiin waxaan darreemay inuu ilaahey rabey inaan sammeeyo.

Ka dib duco baddan iyo fikir, Ilaah ayaan dibadda ugu tilaabsaday inuu sammeeyo waxaan suura gal aheyn. Waxa ugu weyn ee cajiibka ah ow Rabigu igu sammeynaayay waa: “Hal maalin waqtigii, waadna samayn kartaa.” Haddii aan bilaabi lahaa in aan berri ka fakaro, dhibaato ayaan dhex geli lahaay xaqiiqdii degdegga maxaa yeelay waxaan durbadiiba arki lahaay sida aanay middani u suurtoobayn. Weli, maalin kasta, hal maalin waqtigii, dhammaantood wey shaqeeyeen. Ilaah nimco ayuu I siiyey, laakiin ma aha ka hor maalinta aan u baahanaayo. Sannadkii labaad aad ayuu u fududaay sababtoo ah casharradayda oo dhan waa ii diyaarsanaayeen. Sidaas daraaddeed, uma aan baahnayn in aan u diyaariyo si la mid ah sannadkii koowaad.

Waxaa jiray labo sababood oo waaweyn oo uu Ilaah iga dalbaday in aan wax ka qabto shaqadan, ka baxsan barista iyo barashada erayga. Mid wuxuu ahaay inaan helo gacanta-koowaad waayo aragnimo ku saabsan immisa ayaan gaari karraa marrista nimcada ilaaheey haddii noloshu qaadaneysa hal maalin waqtigii.

Si kale oon waayo-aragnimadda barrista ku heli karro tasi sida baddan waa: Hadda waan baraa sida badan Daa,uud oo kale haddana waan safraa iyo baris ooy dheertahay sameynta “Nolosha Ku Jirta Ereyga”

kulammada gurriga. Ilaahay waa wanaagsan yahay, jidadkiisuna waa kaamil.

Meesha kale ee dhinac socota xarriiqintan taas oo u keenta dadka dhibaatooyin baddan ooy ka shalaayaan-noloshooda shalaytada shalay. Dhammaanteen waan qaladnaa. Haa, aan dhahay, “Dhammaanteen waan qaladnaa!” Xitaa dadkaas aad u malaynaysid in aanay weligood qalad sameeynin weey qaldaan. Kitaabka Qudduuska ahu wuxuu inoo sheegayaa in midkeen kasta wuu haysta culaabtiisa yar ee qaladaadka dulmiga. (Galatiya 6:5). Dhammaanteen waxaan sameynaa oon sheegnaa waxyaabaha aanan dooneyn innaa sameyno ama aan dhahno. Mar wixii dhaceen, weey dhacday.

Waan bartay taas intaan ku lumin lahaay nabaddeyda wax aan horay u sammeeyay laakiin aanan wax ka qaban karrin haddeer, waa inaan ku aaminaa Ilaaheey inuu uga shaqeysiiyo dhammaantood sax. Wuu leeyahay awooddaas waad ogtahay. Wuu nadiifin-karraa qaladdaadkeena.

Mararka qaar waxaan irraahdaa walax aanaan rabi-laheyn inaan dhaho. Intaan ka welweli lahaay haddii ama owsan qof I dhibsaniin ama aan ka xanaajiyay, waxaan weydiisanayaa Rabiga inuu ogeysiiyo iyaga qalbigeygu inuu qummanaay, inkastoon cagteyda afkeyga gelliyay. (Doqonimo, xishood la,aan) Waan aaminsanahay isaga inuu qalbiyaddooda ka shaqeynaayo uuna ii isxaan falaayo. Saas awadeed kuma dhumminaayo dhowr maalmood welwel, Dabadeed aan isku yaxyaxo markaan arko iyaga.

Marar madan ayaan ku dhacnaa dabinka in aan waxyaabo badan ka qoomamayno. Daa,uud iyo anigu banaanka ayaan ka cunteynaa marar baddan waayo waan mushquulsanahay. Waqtiyada qaar waxaan galnaa meelo cuntadadeedu xuntahay ama adeeggoodu xunyahay. Waxaan is aragnaa annagoo ka tegeyna, ka dibna saacaddo ayaan ka qoomameynaa waqti-ka dib taas inaan aadnay meeshaas. Rabigu wuxuu I noo muujiyay taas xittaa ka qomameynta doorashada xun ee maqaayadda wuxuu naga xadayaa nabaddeena.

Xusuusnow, inaad ku raaxasato nabadda, iska jooji isku deyga wax ka qabadka wax aanad waxba ka qaban karin. Haddiiba aad gashay goob ganacsi oo aad qarashkaagii dhiibtay, qoomamayntu waxba ka beddeli mayso wixii dhacay.

Imminka aan xaaladaha kuwaas oo kale ah eegno kana dhigno in ay si wanaagsan inoogu shaqeeyaan. Markan waxa aan dhahaynaa, “Bal eeg dadkaas oo dhan ee u socda ineey meeshaas tegaan haddana qanac la’aanta kala kulmaya. Miyeynaan barakeysneyn! Ma ahan innaan ku dhumino waqtigeena iyo lacagteena mar kale.

Boor yar ayaa derbigayga iigu dheggan kaasoo aqriskiisu yahay wax saan oo kale ah: Haddii aad isku daydid inaad u noolaato sidii horre, noloshu way adkaan doontaa. Ciise ma dhihin waan sareeyaa “annigu waan.” Haddii aad isku daydo inaad mustaqbalka u moolaato, noloshu wey adkaanaysaa. Ciise ma dhihin waan sareeyaa “Annigu waan aahaan.” Haddii aad u qaadato maalin kasta sideey ku timmaado, noloshu si wanaagsan ayey u shaqaynaysaa. Ciise wuxuu yirri, “Waan Ahay” (Yooxanaa 8:58). Mar kasta wuu kula jiraa xaalad kasta taasi gacanta ayey ku jirtaa. Kaliya xasuuso inaad aaminto Isaga namcadiisa maantay.

DUCADU NABAD BAY KEENTAA

Filiboy 4:6 wuxuu leeyahy:

“Waxba ha ka daxaddirin” (waxna ha ka walaacina); “laakiinse wax kasta ducadiina baryadiinna ey la jirto mahadcellintu u ogaalaada inuu codsigiina Iaaheey ogaado. Iyo nabadda Ilaaheey, taas oo ka sareysa faham kasta, ayaa ku heyndoonta wadnihiina iyo miskaxdiina habka Masiixi Ciise.”

Nabadda taas oo ka sareysa faham kasta waa wax waayo aragnimo weyn. Markey, tahay dhammaan duruufaha, waa inaad carootaa, cabsi ku jirtaa, jaha wareer ku jirtaa iyo welwel, weli waxaad heysataa nabad taas oon la faah-faahin kaarrin, waa waayo aragnimo cajiiba ah. Dunida oo dhan waa u gaajeysantahay nabadda nuucan ah. Ma gadan kartid, beec ma ahan. Waa hadiyad bilaash ah oo ka timmid Ciise. Addaa iska leh markaad aqbasho Isaga inuu yahay Sayidkaaga iyo badbaadiyahaaga ood baratid inaad ku shaqeeyso mabaadi,i-diisa.

Ducadda balanqaadku waa ducu awood weyn kaas oo culaabtaada kaa dhaqaajiya oo saara Ciise 1 Butros 5:7 waxoow leeyahay, dulsaare taxdirkiina oo dhan isag, waayo weydunku taxadirayaa. *Tarjumaadda kitaabka Quduuska ah oo la balbalaariyay 1 Butros 5:7* wuxuu leeyahay, “Dul saaridda taxadirkaaga oo dhan [walaacaaga oo dhan, welwelkaaga oo dhan, dhammaan waxaad daneyneysid] dushiisa saar, waayo wuxuu kuu daneynayaa si kalgaceyl leh si daxadir lehna wuu kuu fiirinayaa.”

Waa maxay mudnaanta! Masiixiyiin baddan marna ma isticmaalaan faa,iidadan weyn inkastoo ay leeyihiin ayagu?

Erayga ku tuur macnahiisu waa gen ama xoog u tuur. Isla markiiba aad

sammeeyso, isla markiiba ay fiicnaato. Tan waxaad ku sameyneysaa jidka ducadda. Dhibkaaga u dhiib jeceylka daxadirkiisa. Sameey tan isla marka oow ruuxa quduuska ah ku ogeysiyo inaad welwelsantahay ama eey kaa dhuntay nabaddii.

Shaydaanku wuxuu raba inaad welweshid. 1 Butros 5:9 (AMP) waxa uu inoo sheegayaa “u istaaga” Sheydaanka “ka hortaga bilowgiisa”- taas macnaheedu waa billaawga weerarka, isla markiiba. Ha sugin inta uu fursad uu kaa shaqeeyo dhowr maalmood ka helaayo. Wax baddan ood sugto inaad iska caabbiso, wax baddan oow xoog kuu sii haayo oow sii ahaado. Ka dib wey sii adkaaneysaa in la jebiyo oo laga xorroobo. Isla markiiba aad garato waad welwelsantahay. Diid inaad welwelsho. Ku tuur xaalladda daryeelkiisa Ilaaheey. Beddel qaab fikirkaaga.

Markii ugu horraysay ee aan baranayey qodobka ah “ku tuurista daryeelkayga” iyo “welwel la,aanta.” Waan ogaa in fikirkaagu qaldanaa. Waxaan maalinta oo dhan ku lumin jiry hoos u tuurista mala awaal. Isla makiina waa uu soo noqon jirreen. Waxaan xasuustaa anigoo ku jahawareeray wixii oo dhan. Waxaan ku irri Ilaahey, “siduu qof ku awoodaa inuusan ka fikirin waxyaalo?” ma arragtaa, si aadan uga welweling, waa inaad ka fikirin dhibaato. Markii aaddan u baahneyneyn inaad ka fikirto inaad go, aano qaadata, waxaad u fikirri doontaa si qumman ee ku saabsan walaxda ma han si xun. Waxaad ahaan kartaa caqli gal ku saabsan dhibtaada mana ahan xuman.

Welli si waadix ah ayaan u xasuustaa wuxuu ciise igu yirri markaan wediiyay, “sidee ayaanan uga fikirri karrin dhibaatadan” Wuxuu yirri, “aad ayeey u fududahay, Joyce. Kaliya wax kale ka fikir.” Ma aragtaa, kama fikirri kartid dhibaato haddii aad ka fikireysid wax aan dhibaato aheyn.

Filiboy 4:6 wuxuu leeyahay ha welwelin lakiin duceey bedelkeedi. Ayaadda 7 waxeey balan qaaday sidaas haddii aad sameeyso aayada 6, waxaad heli doontaa nabad taas oo ka sarreysa fahamka.

Ayaada 8 (AMP) waxeey leedahay: “inta hartay, walaalayaal, wax kasta oo run ah, wax kasta oo qiimo tixraac leh oo la sharfi karro oo u muuqda, wax kasta oo caddaalad ah, wax kasta oo saafi ah, wax kasta oo la jeclaado oo la jeclaan karro, wax kasta oo naxariis leh, wax kasta oo guul iyo nimco baddan, haddii ay jiraan wax wanaagsan oo heer sarre ah, haddii ay jiraan wax qiimmo leh oo la ammaano, ka fikir... waxyaabahan...”

Hadda, waxa aan Ilaah ka baryayaa in uu idin siiyo nimco, taas oo ah awoodda Ruuxa Qudduuska, inaad ka dhigtaan mabda,aan mid aad ku celcelisaan noloshiina si aad ugu raaxaysataan barakada nolosha nabadda. Waxa aan sidoo kale Eebbe ka baryayaa kheyraad bilaash ah inuu idiin isticmaalo sharafkiisa iyo ammaantiisa.

BARYADA BADBAADADA

Ilaahey wuu ku jecelyahay waxaanu rabaa inaad isaga la yeelato xirriir shakhsi ahaaneed. Haddii aanad hore u aqbalin Ciise Masiix inuu yahay Badbaadiyahaaga, iminka ayaad aqbali kartaa. Kaliya qalbigaaga u fur isaga ku ducaysana ducadan.

“Aabbow, waan ogahay inaan kugu denbaabay ee fadlan I cafi. I nadiifi Waxaan ballanqaadayaa inaan isku halleeyo Ciise oo ah Wiilkaaga. Waxaan rumaysanahay inuu aniga dartay u dhintay oo uu denbigayga dusha u ritay markii uu iskutallaabta ku dul dhintay. Waxaan rumaysanahay inuu ka sarakacay dhimashada. Noloshayda hadda ayaan Ciise u dhiibayaa. Waad ku mahadsantahay, Aabbow Hadiyadda cafiskaaga iyo nolosha daa’imka ah. Fadlan igu caawi inaan dartaa u noolaado. Waxaan kugu baryayaa magaca Ciise Masiix, aamiin.”

Marka aad qalbigaaga sidan kaga barido Ilaah, Ilaah wuu ku aqbalay, wuuna ku nadiifiyay waxaanu kaa xoreeyay dhimashada ruuxiga ah. waqti ku qaado inaad barato ood akhriso aayadahan ka midka ah Kitaabka adigoo Ilaah weydiisanaya inuu kugula hadlo oo kaa caawiyo inaad noloshaada cusub kula socoto isaga.

Yooxanaa 3:16

I Korintos 15:3-4

Efesos 1:4

Efesos 2:8-9

I Yooxanaa 1:9

I Yooxanaa 4:14-15

I Yooxanaa 5:1

I Yooxanaa 5:12-13

Ilaahey bari oo weydiiso inuu kaa caawiyo inaad hesho kaniisad si wanaagsan u aaminsan kitaabka Quduuska ah si aad ugu dhiiranaato koritaanka xirriirka aad la leedahay Masiixi. Ilaahey had iyo jeer wuu kula jiraa. Wuxuuna kugu hoggaamin doonaa hal maalin waqtigii wuxuuna ku tusi doonaa sidaad ugu noolaan laheyd nolol waafiya ee uu kuu haayo.

KU SAABSAN QORAAYGA

JEYCE MEYER waxeey bareysay qoraalka laga bilaabo 1976 ooy waqti –buuxa hageysay laga bilaabo 1980. Waxeey aheeyd qorayga ugu gedista badan ka badan 54 buugaagta waxyiga, waxaa ka mid ah *Secret to Exceptional Living, The Joy of Believing Prayer and Battlefield of The Mind*, sidoo kale ka badan 220 cajaladdood oo maqal ah Albums iyo ka badan 90 videos. Nolosha JOYCE ee erayga, radio iyo televion program ayaa laga sii dayaa dunida oo dhan’ weeyna safartaa si balaaran si ay u gaarsiiso farriinta shacabkeeda “nolosha adduunka dhexdiisa” kulammada. Joyce iyo ninkeeda Daa, uud waxeey waalid u yihiin afar carruur ah gurrigooduna waa St Louis, Missouri.